

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA, MADAXTOOYADDA JSL, HARGEYSA, <i>E-mail: Garyaqaankaguud@gmail.com</i>		
Sanadka: 1aad	Cadadka: 10aad ee October	Taariikh: 03/11/2012
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
<i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii kastaba SL. Sh.</i>		

TUJMADA CADADKA

<p><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:</p> <p>1) Xeerka Baananka Islaamiga ah Xeer No. 55/2012</p> <p><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:</p> <p>2) Hantida Ma-guurtada ah ee Dawladda, <u>WAREEGTO MADAXWEYNE NO:</u></p>	<p>Bogga</p> <p>390</p> <p>425</p>
--	---

0271/102012

3) Waaxo & Hay'ado Dawladeed oo la isku wareejiyey,
XEER MADAXWEYNE No: 0272/102012 427

4) Wakaaladda Horumarinta Waddooyinka (Road Development Agency (RDA)),
XEER MADAXWEYNE No: 0273/102012 428

5) Magacaabid, Wasiirka Wasaaradda Dib-u-dejinta ee JSL 432
XEER MADAXWEYNE No:

0274/102012

6) Magacaabid, Wasiirka Wasaaradda Warshadaha ee JSL.
XEER MADAXWEYNE No: 433

0275/102012

7) Magacaabid, Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Macdanta, Biyaha iyo Tamarta ee JSL. 434
XEER MADAXWEYNE No:

0276/102012

QAYBTA SADEXAAD:

DIGREETOYINKA, WAREEGTOOYINKA, 435
AMARADA & XEER

NIDAAMIYAYAASHA

WASIIRADA, IWM

- 8) FULIN GO'AANO KASOO BAXAY
GUDIGA CADAALADDA.

**QAYBTA AFRAAD: AMARADA &
GO'AANADA MAAMUL**

- 9) Dhaarin Mudane.

QAYBTA SHANAAD:

OGEYSIISYADA

Sooma bixin

438

QAYBTA KOWAAD:

XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER

NIDAAMIYAYAASHA:

XEER MADAXWEYNE Lr:

0270/102012

Dhaqan-galka Xeerka Baananka

Islaamiga ah

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee
ku suntan GW/G/KF-19/569/2012,
kuna taariikhaysan 19/09/2012 ee
Ansixinta Xeerka Baananka
Islaamiga ah Xeer Lr. 55/2012;

Wuxuu Soo Saaray

**Dhaqan-galka Xeerka Baananka Islaamiga ah Xeer Lr.
55/2012 ee Jamhuuriyadda Somaliland.**

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.



Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha Wakiilada
Xarunta Hargeysa.

Ref: QW/G/KF-19/569/2012

Date: 19/09/2012

Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Xeerka baananka Islaamiga
(No.55/2012)


GOLAHA WAKIILADA JSL

- Markuu Arkay:** Qodobka 13^{aad}, 11^{aad} iyo qodobka 5^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland
- Markuu Arkay:** Qodobka 83^{aad}, 61^{aad} iyo 5^{aad} ee Xeerka Baanka Dhexe.
- Markuu Ogaadey:** Muhiimada ay leedahay in xeer loo sameeyo baananka Islaamiga ah.
- Markuu Tixgaliyay:** Kaalinta baananka islaamiga ah ku leeyihiin horumarka dalka
- Markuu Dhagaystey:** Doodda Mudanayaasha ee Xeerka.
- Markuu u codeeyey:** Xeer ka Baanka Islaamka JSL , kal-fadhigii 19^{aad} ee fadhigiisii 4^{aad} ee Golaha 02/09/2012 oo ay goob joog ahaayeen (51) Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada.


WUXUU

Cod aqlabiyad ah (50 cod) oo gacan taag ah ku ansixiyay **Xeer Baanka islaamka** ee (Xeer No. 55/2012), halka cid diiday iyo cid ka amustayna aanay jirin, **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

ALLAA MAHAD LEH


C/risaaq Stiid Ayaanle


C/raamaan Maxamed C/raahi(Cirro)


Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

TUSMADA XEERKA

Cutubka 1aad: Gogoldhigga Xeerkan

Qodobka 1aad: Ereybixinta

Qodobka 2aad: Magaca Xeerka

Qodobka 3aad: Xadka Adeegsiga Xeerka

Qodobka 4aad: Mabaadiida Aasaasiga ee Baananka Islaamiga ah

Qodobka 5aad: Hawlaha iyo Himilada Bangiyada Islaamiga ah

Cutubka 2aad: Awoodaha Baanka Dhexe ee JSL

Qodobka 6aad: Awooddaha Baanka Dhexe ee Baananka Islaamiga ah

Qodobka 7aad: Awooddaha Baanka Dhexe ee JSL u Leeyahay Latalinta iyo Tilmaamida

Qodobka 8aad: Awooddaha Bangiga Somaliland uu Leeyahay soo Dhexgelida Maareynta Bangiyada Islaamiga ah

Qodobka 9aad: Masuuliyadda Kor Joog Nidaamada Baanka

Qodobka 10aad: Kormeerida, Baadhista iyo Kaantaroolada Baanka Somaliland ku Leeyahay Bangiyada Islaamiga ah

Cutubka 3aad: Qaab-xisaabeedka Baanka Islaamiga

Qodobka 11aad: Qaab-xisaabeedka Baanka Islaamiga

Qodobka 12aad: Hanti-dhowrka Bangiyada Islaamiga ah

Cutubka 4aad: Ruqsadiinta Baanka Islaamiga ah

Qodobka 13aad: Shuruucda Ruqsandiinta Baanka Islaamiga ah

Qodobka 14aad: Codsiga Ruqsadaha iyo Hubinta

Qodobka 15aad: Ruqsadiinta Baananka Islaamiga ah

Qodobka 16aad: Burinta Ruqsadda

Qodobka 17aad: Magac-bixinta Baananka Islaamiga ah

Cutubka 5aad: Lahaanshaha iyo Maamulka Baananka Islaamiga ah

Qodobka 18aad: Asaasida iyo Dhisida Baan Islaamiga ah

Qodobka 19aad: Xadaynta Lahaansha rasmaal

Qodobka 20aad: Xidhiidh Baan Shisheeye oo uu Samaysan Karo
Baan Islaami ahi

Qodobka 21aad: Rasamaalka Gundhigga Baan Islaami ah

Cutubka 6aad: Qaab-dhismeedka Maamul ee Baananka Islaamiga ah

Qodobka 22aad: Qaab-dhismeedka Maamul ee Baananka
Islaamiga ah

Qodobka 23aad: Illaalinta Sirda Baanka

Qodobka 24aad: Dhigaalka Baanka iyo Xadayntiisa

Qodobka 25aad: Kaydka qoondaysan ee Baanka

Qodobka 26aad: Hantida Dareertada ah

Qodobka 27aad: Xidhiidhka Baanka Dhexe iyo Baananka
Islaamiga ah

Cutubka 7aad: Damaanadaha Faa'iido Qaybsiga Isu-biirada Baananka iyo Xakameyntooda

Qodobka 28aad: Bixinta Damaanadaha Daymaha iyo Horumarka
Maaliyadeed

Qodobka 29aad: Faa'iido iyo Khasaare Qaybsiga

Qodobka 30aad: Isku Biirida Baananka

Qodobka 31aad: Golaha Shareecadda Islaamka ee Baanka

Qodobka 32aad: Masuuliyadda iyo Awooddaha Golaha
Shareecadda

Qodobka 33aad: Xidhiidhka Golayaasha Shareecadda

Qodobka 34aad: Nidaamka Gebogebaynta Baan Islaami ah

Cutubka 8aad: Qodobadda Guud

Qodobka 35aad: Maalmaha Sharci iyo Fasaxa Baananka

Qodobka 36aad: Dambiyada Agaasimayaasha, Shaqaalaha iyo Wakiillada

Qodobka 37aad: Ciqaabo

Qodobka 38aad: Mamnuucida Dilaal-qaadashada Shaqaalaha

Qodobka 39aad: Oggolaansha Xeer-illaaliyaha Guud

Qodobka 40aad: Fasiraada Qodobadda Xeerka

Qodobka 41aad: Shuruudo Guud

Qodobka 42aad: Nasakhaad ama Laalis

Qodobka 43aad: Dhagangalka Xeerkan

Lifaaqa Koowaad: Foomka Codsiga Ruqsada ka-ganacsiga Hawlaha Baanka

Lifaaqa labaad: Foomka Codsiga Ruqsadda ka-ganacsiga Hay'ad Maaliyadeed

CUTUBKA 1AAD

GOGOL-DHIGA XEERKA

Qodobka 1aad: Eraybixinta

Ereyada xeerkan waxa loo fasirayaa ama loo micnaynayaa, haddii aanu ka hor imanayn ama aanu diideyn nuxurka qodobada Xeerkan sidatan:

“Dalka” waxaa loola jeedaa dalka Jamhuuriyadda Somaliland

“Madaxweynaha” waxaa loola jeedaa Madaxweynaha Jamuuriyadda Somaliland;

“Baanka Somaliland (Central Bank of Somaliland)” micnihiisu waa Baanka Dhexe ee Somaliland ee lagu aasaasay Xeerka Baanka Dhexe (Xeer Lam: 54/2012) Central Bank Act;

“Guddiga Agaasinka Baanka Dhexe ee Somaliland” (the Board of Directors) waa xubnaha lagu aasaasay Xeer Lam: 54/2012 (Xeerka Baanka Dhexe) Cutubka 3aad qodobka 7aad;

“Baanka Islaamiga ah (Islamic Bank)”: waxa loola jeedaa Baanka Ruqsada la siiyay si waafaqsan xeerkan iyo Xeerka Baanka Dhexe (Xeer Lam: 54/2012);

“Laan (Branch)” waxaa loola jeedo Laan uu Bangi Islaami ahi ka furtay / ka furanayo meel dalka Somaliland ka mid ah

“Asaasyaal (Promoters of Founders): waxaa loola jeeda xubnaha lahaa fikradda lagu dhisay baanka Islaamiga si waafaqsan xeerkan;

Raasamaalka Aasaasiga ah: waa lacagaha ay isu geeyeen saamilaydu ee lagu asaasay Baanka Islaamiga.

Dhigaal: Xeerkan marka laga hadlayo “*Dhigaal*” waxa loola jeedaa qadder lacag ah oo lugu dhiibay heshiis si:

a. Dib loogu soo ceshado marka loo baahdo ama gaadho wakhti hore laysula gartay dhigtaha iyo la dhigtaha oo noqonaya baanka.

b. Aan ahayn hanti kale ama adeeg ama qaan-reeb (security).

Hantida dareertada ah (liquid asset): waxa loola jeeda lacagta naqadka ah (cash) ;

Saami (Share): Micnaheedu waa xaddi ama qadar lacageed ama hanti qof ama kaydsade ku darsaday hawlo ganacsi si uu macaash uga helo kana mid ah rasamaalka guud ee lagu fulinyo hawsha ganacsi waxaana loo fasirayaa si waafaqsan xeer Lam 25/2004 qodobkiisa 2aad, 78aad, 79aad 81aad iyo 86aad;

Xafiis (Office): waxaa loola jeedaa goobta xarunta u ah baanka islaamiga ah ama laamihiisa (branches);

Golaha Saamilayda Guud (General Assembly): waxa loola jeedaa hantilayaasha ama xubnaha saamilayda ee baanka islaamiga ah;

Golaha Agaasinka (Board of Directors): waxaa loola jeedaa xubnaha maamulka sare ee ay soo doorteen golaha saamilaydu baanka si waafaqsan Xeer Lam: 25/2012 farqadiisa 30aad;

Golaha Sharecadda Islaamka: waxaa loola jeedaa gole culimo ah oo ka mid ah hay’adaha maamulka ee baanka islaamiga ah, hawshooduna tahay hubinta in hawlaha baanku ay waafaqsan yihiin Sharecadda Islaamka si waafaqsan Xeerka Baanka Dhexe Cutubka 14aad qodobkiisa 115aad;

Shirkadda/Hay’ad iyo Baan: waxaa loola jeedaa xeerkan dhexdiisa Baanka Islaamiga ah;

Kaydsade (Depositor): waa qofka xisaab ku leh Baanka Islaamiga ah, xisaabtu ha ahaato xisaab socota, ama xisaab kaydsi ah ama xisaab maal-gashiyeed iwm;

Shirkad Shisheeye (Foreign Company): micnaheedu waa ka uu siiyay Xeer Lam: 25/2004

Baanka Islaamiga ah ee Caalamiga ah (International Islamic Banks): micnaheedu waa Baanka Islaami ah oo ka jira ama ka hawlgala hal wadan wax ka badan;

Keyd Islaami ah (Islamic Fund): micnihiisu waa qadar lacageed oo qiimaheedu gacanta lagu dhigay ama la bixiyey, taasoo gacan

ku dhigeen ama dib-u-bixinteedu ku salaysan tahay axkaamta Shareecadda Islaamka;

Rukhsadda Ganacsiga (License): micnaheedu waa shatiga ganacsiga lagu oggolaaday hawlgal baan Islaamiya, si waafaqsan Qodobka 5aad, 6aad, 7aad ee xeerkan iyo Xeerka Baanka Dhexe;

Shikadda Dawladeed (Public Company): micnaheedu waa ka uu siiyay farqada 4aad ee Xeer Lam: 25/2004'

Macanaha hantida dareertada ah (Liquid Asset): waxa loola jeeda:

- a. lacagta noodhka ah ama jarjarka (qadaadiiic) ah ee kasocota Jamhuuriyadda Somaliland
- b. Hadhaaga xisaabeed ee Baan Islaami ah ugu jirta xisaab Baanka Dhexe ugu furan.
- c. Hadhaaga xisaabeed ee ku jirta xisaabaha Baanka Islaamiga ah uga furan bangiyada kale ee dalka gudihisa iyo dibeddiisa ee la heli karo marka loo baahdo.
- d. Shahaadooyinka maalgashi ee kala duwan, kuwasoo Baanka Islaamiga ah uga soo baxday Baanka Dhexe si wafaqsan axkaamta Shereecadda Islaamka

Qodobka 2^{aad} Magaca Xeerka

Magaca xeerku waxa uu noqonayaa Xeerka Baananka Islaamiga ah

Qodobka 3^{aad} Xadka Adeegsiga Xeerka (Scope of the Act):

1. Xeerkan waxa lagu dabaqayaa loona adeegsanayaa dhammaan Baananka Islaamiga ah ee heshiisyadooda asaasiga ah uu ku cad yahay inuu baanku ku dhaqmayo Axkaamta Shareecadda Islaamka ee ka hawlgala Somaliland.
2. Baananka Islaamiga ah laguma dabaqi karo xeerkasta, wareegtooyin ama xeer hoosaadyo ka soo horjeeda Axkaamta Shareecadda Islaamka.

Qodobka 4^{aad} Mabaadi'da Asaasiga ah ee Baananka Islaamiga ah

Baananka Islaamiga ahi waxa ay ku dhisan yihiin, kuna shaqaynayaan mabaadi'da iyo dhaqan wanaagsan oo ku salaysan Shareecadda iyo Axkaamta Islaamka, sida:

- a.** Hirigelinta nidaamka dhaqaale ee Islaamka, gaar ahaan dhinaca maaliyadda iyo baananka;
- b.** Waxa ay hawlahooda maaliyadeed u raacayaan khusuusiyaad ku salaysan hab-dhaqaale iyo maaliyadeed oo waafaqsan Nidaamka Shareecadda Islaamka;
- c.** Ka sokow inay yihiin baanan faa'iido doona, haddana waxa uu xil ka saaran yahay horumarinta arrimaha bulshada;
- d.** Waxay ka qaybqaadanayaan kor-u-qaadista heerka shaqaalaynta iyo wax-soo-saarka waddanka;
- e.** Waxay bulshoweynta u soo bandhigayaan adeeg casri ah oo tartangeli kara, isla markaana hufan oo xalaal ah, qancin karana dhammaan macmiishooda;
- f.** Waxay ka shaqaynayaan kor-u-qaadista aqooneed iyo wacyiga bulshada ee arrimaha bangiyada;
- g.** Baananka Islaamiga ahi waxay kaalin mug leh ka qaadayaan horumarinta arrimaha ganacsiga ee JSL.

Qodobka 5aad

Hawlaha iyo Hamilada Bangiyada Islaamiga ah

Baananka Islaamiga ahi waxay qabanayaan dhammaan hawlaha iyo adeegyada ay baananka ganacsiga (Commercial Banks) iyo kuwa maalgalintu sameeyaan, iyagoo ku dhaqmaya hab waafaqsan mabaadi'da iyo Axkaamta Shareecadda Islaamka, sida qabashada dhigaalada ee kala duwan iyo hawlaha maalgalinta waxa kale oo ay qabanayaan hawlahaan soo socda:

- a.** Kobcinta iyo horumarinta hababka keydinta iyo xisaabaadka maalgelinta;
- b.** Ka-qaybqaadashada hawlaha maalgelinta ee dhinacyaha beeraha, wershadaha, xoolaha, dhismayaasha, jidadka iyo dhamaan hawlaha horumarinta dhaqaalaha;
- c.** Bixinta dhammaan adeegyada maaliyadeed oo loo fulinaayo hab waafaqsan Xeerka Bangiga Dhexe, Dastuurka dalka iyo Shareecadda Islaamka;
- d.** Gacansiinta maaliyadeed ee xirfadlayda iyo ganacsatada soo koraya;

- e. Samaynta ama ka-qayb-qaadashada abuurista shirkadaha ama sanduuqyada dhaqaale iyo maaliyadeed ee dalka;
- f. Soo saarista saamiyada iyo shahaadooyinka maalgashi ee shirkadaha iyo sanduuqyada maaliyadeed.
- g. Maalgelinta dhammaan mashaariicda wax-ku-oolka ah ee kala duwan;
- h. Galista heeshiisyada ganacsi, maalgashi iyo adeeg ee dalka gudahiisa iyo dibadiisaba;
- i. Wax-ku-yeelashada saami raasamaal bangi kale dalka gudahiisa iyo dibadiisaba, si waafaqsan qodobada xeerkan iyo Xeer Lam:54/2012;
- j. Yeelashada hantida guurta ama maguurtada ah ee bangigu hawlihiisa ku fulinaayo ama uu ka sii ganacsanaayo sida mashaariicda kirooyinka;
- k. Baananka Islaamiga ahi waxa ay xisaabo u furi karaan macmiishooda ku sugan dalka gudahiisa iyo dibadiisaba haday tahay xisaabaha lacagaha qalaad iyo tan dalkaba;
- l. Macmiisha dhigaalka maalgalined ku leh Baanka Islaamiga ah waxa ay wax-ku-yeelanayaan wixii faa'iido ama khasaare ka dhasha hawlgelinta dhigaalkooda, iyada oo xaaladda khasaaraha ay shardi u tahay in aanu baanku la iman wax xad gudub ah ama gabood fal ah oo ku aadan maalgelinta iyo maamulkeedaba.

CUTUBKA 2AAD

AWOODAHA BAANKA DHEXE EE JSL

Qodobak 6aad

Awoodda Baanka Dhexe ee ku Aadan Baananka Islaamiga ah

Sida ku cad Cutubka 9aad qodobkisa 83 ee Xeerka Baanka Dhexe ee Somaliland, Baanka Dhexe waxaa uu awood u leeyahay

- Ruqsad siinta baananka Islaamiga ah.
- Diwaangalinta
- Kor-ka illaalinta iyo
- Hagidda

Qodobka 7aad

Awooddaha Baanka Dhexe ee Somaliland u Leeyahay, La- talinta iyo Tilmaamidda

1. Haddii Baanka Dhexe ee Somaliland ku qanco:

a. In hawlaha Baanka Islaamiga ah loo wado si aan waafaqsanayn ama ka hor imanaysa xeerkan ama si ka dhan ah danaha dadka dhigaallada leh ama tan dadwaynaha.

b. In Baanka Islaamiga ah cid ka tirsan maaraynta guud ku jirto hawlo gabood fal ku ah xeerkan waxaa baanka dhexe ee Somaliland:

i. Kala talinayaa baanka sida hab-dhaqanka hawleedu u muuqdo guud ahaanba;

ii. Siin karaa baanka tilmaamo lagu hagaajinayo hab-dhaqanka hawsheedu u muuqdo guud ahaanba

iii. Siinayaa tilmaamo baanka cid kasta ama sarkaal kasta oo hay'adda ah in laga reebo sifo kasta oo ku soo arooraysa xeerkan.

2. Baanka Dhexe ee Somaliland, ka hor inta aanu wax tilmaamo ah ama amaawiir ah soo saarin sida ku cad qodobkan, waxa uu ogeysiinayaa baanka ay khusayso isaga oo sharaxaad ka bixinaya sababaha ka dambeeya, isaga oo ka dalbanaya baanka in wakhti ku habboon lagu sababeeyo sida wax u dheceen.

3. Baanka Islaamiga ah ee ay soo gaadheen tilmaamaha Baanka Dhexe sida ku cad qodobkan, waa inay wakhtiga loo cayimo ku hirgalisaa, haddii loo baahdana, ay caddaymo ka keento inay ku dhaqantay wixii la faray.

4. Baanka Dhexe ee Somaliland waxaa uu tilmaamo ka siin karaa baanka ay khusayso si ay u horumariso oo wax uga beddesho hab-dhaqanka hawlaheeda sida uu caddaynayo Qodobkani, kadib marka la ogaysiiyo maamulka sare ee baanka.

5. Qof kasta oo ka xadgudba tilmaamaha Qodobkan waxaa uu mutaysaanayaa ciqaabta uu jideeyay xeerkani.

Qodobka 8^{aad}

Awoodda Baanka Dhexe u Leeyahay soo Dhexgalida Maaraynta Bangiyada Islaamiga ah

Haddii ay timaaddo xaalad maamul ama maaliyadeed oo keeni karta in baan Islami ahi xidhmo halisna ku ah maslaxadda

dhigaalayda baanka iyo dhaqaale ee waddanka labadaba, isla markaana loo waayay wax maaraynaya xaaladaas, waxa;

1. Gudoomiyaha Baanka Dhexe uu awood u leeyahay inuu magacaabo Agaasime ama Maareeye Guud (DG) oo hawsha baanka la wareega, isaga oo raacaya nidaamka guud ee baanka iyo wixii shuruucda ah ama muddo hawleed ee Agaasinka Baanka Dhexe ee Jamhuuriyadda Somaliland uu cayimo.

2. Magacaabidu kama badan karto laba iyo toban (12) bilood sida uu ku caddaynayo bangiga Somaliland magacabista uu samaynayo, oo ay cusboonaysiin karto uun Maxkamadda Sare haddii uu sidaa codsado Baanka Dhexe ee Somaliland Maxkamadduna ay ku qanacdo in sii-dheeraynta magacaabistu maangal tahay.

3. Agaasimaha ama Maareeyaha Guud (DG) marka uu la wareego maamulka Baanka Islaamiga ah waxa uu si waafaqsan kaganacsiga hawsha baanka uu agaasimaya si xilkasnimo leh oo waafaqsan xeerkan iyo Xeer Lam: 54/2012.

4. Hawlaha uu mareeyuhu u xilsaaran yahay, waxa ka mid noqon doona:

a. Raad-goobka iyo illaalinta hantida baanku leeyahay

b. Soo-celinta daymaha kamaqan baanka

c. Qiimaynta qaab-dhismeedka rasamaalka baanka iyo kan maareenteda, iyada oo uu u soo jeediyo Baanka Dhexe Somaliland dib-u-habayn ama dib-u-qaabayn kasta oo door moodo oo uu isagu, si waafaqsan Xeerkan u hirgelin karo iyadoo loo danaynayo baanka.

d. Saxeexida ama galida heeshisyo ay ka mid yihiin kuwo maaliyadeed ama maalgashi oo lagu kabcinayo baanka, oo uu mareeyuhu u arko daruuri

e. Ka guddoonto sarkaal ama hawlwadeen baan wixii dukumanti, raad-reebyo kale, xisaabaad ama xogo la xidhidha hawlaha uu baanku ama hay'addu ka ganacsato.

5. Isaga oo gudanaaya waajibadkiisa shaqo, Maareeyuhu waxa uu awood u leeyahay inuu muddo-joojiyo (Moratorium) sida hawlaha dhigaalka, maalgalinta ama daymahaasi loogu celiyo hantidooda, iyada oo muddo-joojintu;

a. Si isku mid ah ugu fulin doonto dadka daymaha leh oo idil, iyada oo haddii dayn ama amaahi kaga maqan tahay baanka lafteeda qaan-sheegtaha ama mulkiilaha dhigaalka laga

goynkaro ama lagu gudbin karo daynta isaga ku maqan ee baanku ku leeyahay.

- b. Mareeyihii Baanka loo magacaabay waxa uu joojinayaa hawl-maalmeedka iyo maraynta baanka marka uu dhammaado xilligii loo qoondeeyey.
- c. Golaha Agaasinka Baanka Dhexe waxa uu tilmaami Kara in qaab-dhismeedka maamul ee Baan Islaamiya wax laga beddelo, iyada oo la dhowrayo danaha dhigaal yada baanka iyo ta guudba.

Qodobka 9^{aad}

Masuuliyadda Kor-joog Nidaamadda Baanka

Agaasimaha Guud (DG) ee Baanka Dhexe ee JSL u magacaabay Baanka Islaamiga ah waxa uu qoraal ku siinayaa **baanka ku** gafay jadwal caddaynaya ciqaabaha uu mutaystay iyo **ganaaxa** ku waajibay iyo wakhtiyada/qaababka loo kala bixinayo

- a. Haddii Baanka Somaliland ku qanci waayo xog laga siiyay xadgudub uu baan ku kacay, waxa sii soconaya ganaaxa lagu xukumay ilaa la saxaayo xadgudubka ama gefka uu baankaasi galay.
- b. Haddii Baanku ku qanco in xadgudubka dhacay la saxo, ciqaabtiisii halkaas ayay ku hadhaysaa oo ku soo af-jaarmaysaa.

Qodobka 10^{aad}

Kormeerka, Baadhista iyo Ilaalinta Baanka Somaliland ku Leeyahay Bangiyada Islaamiga ah

Kormeerka Baanka Dhexe Somaliland ku sameeyo Baananka Islaamiga ahu xilsaaran

Guddida Agaasinka ee Baanka Dhexe ayagoo;

1. Masuuliyada hagista nidaamka maaliyadeed ee baanka, gaar ahaan nidaamka dayn bixinta iyo maamulka keydka gudaha iyo dibedda iyo sidoo kale illaalinta qiimaha lacagta Somaliland iyo waxyaalaha kale ee muhiimka u ah koritaanka maaliyadeed dhaqaale ee waddan.
2. Ilaalinta habsami-u-socodka hawlaha Bangiyada Islaamiga ah
3. Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu Baan Islaamiya ku samayn karaa baadhitaan uu ku hubinayo in hawsha baanku u

socoto si hufnaan iyo habsami ah oo waafaqsan xeerkan.

4. Marka baadhis ama kormeer noocan ah la samaynayo waxa ku waajib ah sarkaal kasta iyo hawl-wadeennada baanka ama hay'adda in ay qofka kormeeraya xisaabaadkooda u soo saaraan oo siiyaan buugagga xisaabaadka iyo dhammaan xogo-xisaabeedka loo baahdo iyo wax kasta oo xog-ururina ama xaqiiqo raadintaa, wakhtiga loo mudeeyey; iyada oo haddii taa laga gaabsado oo la heli waayo buugagga xisaabeed iyo xog-xisaabeedyada kale wakhtiga loo cayimay loo arki doono baankaasi ama hay'addaas mid ku gobood-fashay xeerkan

5. Sarkaalka ama saraakiisha Baanka Dhexe ee Somaliland u igmato kormeerka waxa uu warbixintiisa u soo gudbinayaa Golaha Agaasinka ee Baanka Dhexe ee Somaliland

CUTUBKA 3AAD

QAAB-XISAABEEDKA BAANKA ISLAAMIGA AH

Qodobka 11^{aad}

Qaab-xisaabeedka Baanka Islaamiga ah

Baan kasta oo Islaami ah waxa ku waajib ah inuu:

1. Baanka Somaliland u diro xisaab-xidhka sannad laha ah ee Baanka oo ay ku jiraan xaashida dheelitirka miisaaniyadda iyo xisaabta khasaaraha iyo faa'iidada ee baanka oo dhammaantood hanti-dhawrsan, isla markaana uu oggolaaday Golaha Saamilayda Baanku.

2. Si aan qarsoodi lahayn u dhigo, loogana helo xafiisyada baanka xisaab-xidh sannadeedkiisa.

3. Haddii hay'adi/baan Islaami ahi ka gaabiyo inuu Baanka Dhexe ee Somaliland ugu soo gudbiyo xilliga loo cayimay xisaab-xidh sannadeedka oo Hanti-dhowrka soo maray iyo warbixinta Hanti-dhowrka ama uu ka gaabiyo inay, sida hadba baanka Dhexe ee Somaliland ka soo codsado u bixiyo xogaha laga rabo oo dhab ah oo buuxa/dhamaysna tiran, hadii xogtu dhimantahay wuxuu muteysandoonaa ganaax lacageed oo xeerkan waafaqsan.

Qodobka 12^{aad}

Hanti-dhowrka Baananka Islaamiga ah:

1. Sida ku cad xeerka shirkadaha ee xeer Lam 25/ 2004, Baan Islaamiya oo waliba waxa uu soo magacaabayaa sannad kasta Hanti-dhowre madaxbannaan, waxaanna loo soo bandhigayaa

Baanka Dhexe si ay u ansixiyaan.

2. Baanka Dhexe ee Somaliland waxa ay magacaabi karaan Hanti-dhowre haddii Baanka Islaamiga ahi uu soo magacaabi, waayo Hanti-dhowre madaxbannaan.

3. Waajibaadka Hanti-dhowraha ku xusan faqrada 1aad iyo 2aad ee loogu talo galay Baanka Islaamiga ah, wuxuu noqon karaa;

a) In uu sannadkaa gudahiisa qabto hawlihii loo magacaabay ee shaqada Hanti-dhowrka ah;

b) In uu warbixin ku sameeyo baadhitaankiisa xaashida dheelitirka (Balance Sheet) iyo xisaabta faa'iidada iyo khasaaraha (Profit and Loss Account) ee baanka;

CUTUBKA 4AAD
RUQSADSIINTA BAANKA ISLAAMIGA AH
Qodobka 13aad
Shuruudaha Ruqsadsiiinta Baananka Islaamiga ah (License)

1. Cidina Kama dhaqan galin karto JSL hawlo la xidhiidha ku ganacsiga Baanka Islaamiga ah ama hay'ad kale oo maaliyadeed oo islaami ah haddii aanay oggolaansho ka haysan Baanka Dhexe si waafaqsan qodobada 83aad, 84aad iyo 85aad ee Xeerka Baanka Dhexe iyo xeerkan.
2. Shirkad kasta oo doonaysa in ay hawlo baan oo Islaamiya ka hirgeliso dalka waa in ay codsi oggolaansho ah u gudbisaa Baanka Dhexe.
3. Waxaa baanka islaamiga ah waajib ku ah inuu ku shubo baanka dhexe lacag (deposit fund) oo dhan **\$ 2,000,000** laba milyan oo Dollar.
 - a. Haddii uu doono in baanka islaamiga ahi la baxo lacagtaasi waxaa shardi ah inuu keeno mulkiyad dhisme ah (fixed asset) oo qiimaheedu gaadhayo **\$2,000,000. Laba milyan oo Dollar.**
 - b. Baanka islaamiga ahi lacagtaasi lama bixi karo sadexda sano ee hore
 - c. Habka qiimaynta hantidaasi waxaa go'aan ka gaadhaya baanka dhexe
4. Guddida Agaasinka Baanka Dhexe ayaa awood u leh in uu soo saaro, oggolaansha codsiga Baan Islaami ah marka la buuxiyo shuruudaha ku xusan xeerkan.
5. Waxa loo soo gudbinayaa Baanka Dhexe ruqsadsiiinta Baan Islaami ah oo uu soo sexeexay Guddoomiyaha Golaha Asaasayaasha iyo xubin kale oo ka tirsan Golaha Asaasayaasha Baanka Islaamiga ah kuna lifaaqsan yihiin waxyaabaha soo socda.
 - a) Heeshiiska aasaasida iyo xeer-hoosaadka baanka/shirkadda ama hay'adda lagu dhisay (Article of Incorporation/Association) oo ay ku caddahay in uu baanku ku dhaqmaayo hab ganacsi ama adeeg oo waafaqsan Axkaamta Shareecadda Islaamka;
 - b) Liiska magacyada asaasayaasha jinsiyadahooda ay ku leeyihiin raasamaalka;
 - c) Liiska magacyada Golaha Shareecadda oo ay soo oggolaadeen Golaha Samilayda guud;

- d) Liiska magacyada maamulka guud ee baanka oo ay ku lifaaqan yihiin taariikh nololeedkooda (CV) oo kooban;
 - e) Daraasad ku saabsan abuurista baanka (Feasibility Study) oo muujinaya odoraska maaliyadeed ee ugu yaraan 3da sano ee soo socda;
 - f) Cadayn muujinaysa bixinta raasamaalka gundhiga ah;
 - g) Hadii cida ruqsada doonaysaa ay tahay laan (branch) baan ajanabi oo Islaamiya, waxay kala mid tahay shuruudaha kor ku xusan, waxaa kale oo looga baahan yahay.
- I.** In baanka ajanabiga ahi u keeno Baanka Dhexe JSL dhulka uu asal ahaan ka diwaangashan yahay iyo codsi oggolaansho ah in uu laan ka furto dalka Somaliland;
- II.** Waxa kale oo looga baahan yahay xaruntiisa guud qoraal rasmi ah (Undertaken) oo ah in uu baankaasi ku ballanqaadayo masuuliyada laantiisa.
- III.** Wixii caddaymo kale ah ee uu u baahdo Baanka Dhexe ee Somaliland.

Qodobka 14^{aad} Codsiga Ruqsadaha iyo Hubinta

1. Hay'ad kasta oo daneenaysa in ay ka bilawdo hawlo baan Islaami ah JSL intaanay bilaabin hawlaheeda waxa ay qoraal u diraysaa Baanka Dhexe oo ay kaga codsanayso Baanka Dhexe ee Somaliland oggolaansho sida ku cad qodobka 7aad ee cutubkan.
2. Guddiga Agaasinka Bangiga Dhexe ee Somaliland waxa uu hubinayaa codsiyada loo soo gudbiyay isagoo sidaa ku bixinaaya ruqsada hadii ay dhamays tiran yihiin dhammaan shuruudaha ruqsad siinta.
3. Haddii shirkad ay hawl ganacsi ama adeeg maaliyadeed oo Islaami ah ku guddo jirtey dhaqangalka xeerkan ka hor waxa ay shirkadaasi dib u soo codsanaysaa oggolaansho isla dhaqangalka xeerkan ka dib.
4. Baanka Dhexe JSL waxa uu kaga jawaabayaa muddo aan ka badnayn 30 cisho gudaheed, oo ka bilaabmaysa maalinta codsiga laga qabto shirkaduna ay buuxiso shuruudaha ruqsadsiinta.
5. Fiiga ruqsadsiinta Baanka Islaamiga ah waa hal mar kaliya waana **\$150.000** (Boqol iyo Konton Kun oo Dollar) oo kaliya.

6. Ruqsad siinta ka sokow bangiga Somaliland waxa uu hubinayaa, ku-habboonaansha iyo hab-dhaqameedka dadka loo soo xushay hay'adda ruqsada codsatay.
7. Marka shirkad soo codsato qaadashada ruqsada Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu xaq u leeyahay in uu hubiyo kuna qanco:
- a) Haynta maaliyadeed iyo sooyaalka shirkadda;
 - b) Qaabka iyo qaybaha maamulka ee la soo gudbiyay;
 - c) Golaha Shareecadda loo asteeyay Baanka Islaamiga ah;
 - d) Raasamaalka iyo odoraska faa'iidada baanka;
 - e) Danta dalka iyo daryeelka bulshada, ee ruqsada la bixinaayo laga dheefaayo;
 - f) Haddii baanku ku qanci waayo waxa uu awood u leeyahay in uu diido in aanu siin ruqsada si waafaqsan xeerkan iyo Xeerka Baanka Dhexe.
 - g) Haddii uu diido baanku, waxaa shirkadda soo codsatay ka codsanaysaa baanka inuu ku sameeyo dib-u-eegis go'aankii loogu diiday ruqsada;
 - h) Go'aanka Kama dambaysta ah ee siinta ama diidmada ruqsada baananka waxaa iska leh Baanka Dhexe ee JSL.
8. Banka Dhexe ee Somaliland waxa uu ka qaadayaa Baanka Islaamiga ah shatiga cashuur sannadeed dhan **30,000 USD**

Qodobka 15^{aad} Ruqsadsiinta Banaanka Islaamiga ah

Iyadoo la tix galinaayo qodobka 7aad iyo 8aad ee Xeerka Baanka Dhexe ee Somaliland iyo xeerkan waxa uu siinayaa ruqsad marka fiiga laga shubo Baan Islaamiya,

1. Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu ku lifaaqi karaa ruqsad bixin waafaqsan qodobadan shuruudaha uu u arko in ay daruuri yihiin, waxaanu hadba xili wax-ka-beddeli karaa ama mid ka mid ah ku doorin karaa hadba sida ay daruufu u muuqado, taas oo waafaqsan qodobadda xeerkan.
2. Baanka ama Hay'adda muddo 12 bilood gudohood ah bilaabin hawlihii ruqsada loo siiyay waxa ay mar kale u soo cod sanaysaa ruqsad sida ku cad Qodobadda 7aad iyo 8aad ee xeerkan
3. Cusboonaysiinta ruqsad waxa qoraal loogu soo gudbinayaa Baanka Dhexe Somaliland 3 bilood ka hor wakhtiga dhicitaanka ruqsada.

4. Marka la bixiyo fiiga cusboonaysiinta ruqsada Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu u cusboonaysiinayaa baanka ama hay'adda inay sii wadato hawlaheeda ganacsi muddo 1 sanno.
5. Haddii aan 3 bilood gudohood dhacistaanka ruqsada hore loogu soo gudbin codsi cusboonaysiin waxa ku waajib ah 30% (boqolkiiba 30) dheeraad ku ah fiigii caadiga ahaa codsada.
6. Baanka ama shirkadda la siiyay ruqsad ma wareejin karto wax ka badan 5% (boqolkiiba 5) saamiyada baanka ama shirkadda, iyadoon ka haysan oggolaansho Baanka Dhexe ee JSL.
7. Oggolaansho qoraal ah oo laga helo Baanka Dhexe ee Somaliland mooyaane, Baan Islaamiyi Kama furan karo laamo cusub, wakaalad ama xafiis meel kasta oo ka mid ah dalka Somaliland gudihiisa.

Qodobka 16^{aad} Burinta Ruqsada

1. Gudida agaasinka ee baanka Somaliland, isaga oo qoraal ku siinaya, waxa uu burin karaa ruqsad baananka haddii:
 - a) Hawlaheedii ganacsi ka joogsadeen Jamhuuriyada Somaliland;
 - b) Shirkaddu kacday, la kala diray, ama si kaleba u duuduubatay.
 - c) Baal marto ku dhaqanka xeerkan ama Xeerka Baanka Dhexe iyo xeerarka kaleba;
 - d) Ay caddaato in Baanka Islaamiga ahi uu baal maray Axkaamta Shareecadda Islaamka, isla markaana ka dhego adaygay talooyinka Golaha Shareecadda Islaamka ee Baanka Dhexe;
2. Baanka Islaamiga ahi waxa uu xaq u leeyahay in uu u dacwodo maxkamadda ay khusayso dacwadiisu, haddii uu arko in ruqsada looga qaaday sifo aan sharci ahayn
3. Hay'adda liisankeeda la buriyay waxa ay hawlaheeda ku gabogabaynaysaa hawlgalkeeda muddada uu u cayimo Baanka Dhexe ee Somaliland iyada oo aan dhigaalo dambe, furid xisaabo cusub, amaah-bixin iyo maalgelin hor leh toona ku tallaabsan doonin.
4. Iyada oo aan laga noqonayn burinta ruqsada ayaa baanka dhexe ee somaliland waxa uu u furan in uu qaado talaabo kasta oo uu ku damaanad qaadayo xaq iyo xoolaha kayd dhigashada sida iyadoon laga tallaabsan Karin khusuusiyaadka baananka islaamiga ahi leeyihiin;

5. Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu ka tirtirayaa liiska diwaangelinta ee Baananka Islaamiga ah magaca shirkadda ama baan lagala noqday ruqsada, waxaanu ku faafinayaa warsidaha rasmiga ah ee dawladda (Official Bulletin) ee uu soo saaro Gar-yaqaanka Guud ee Dawladdu.

Qodobka 17^{aad}

Magac Bixinta Baananka Islaamiga ah

1. Magaca Baananka Islaamiga ah waxa oggolaanaya Baanka Dhexe ee JSL si looga foojignaado in aan Baan Islaamiya la bixin magac aan ku habboonayn.

CUTUBKA 5AAD

LAHAANSHAHA IYO MAAMULKA BAANANKA ISLAAMIGA AH

Qodobka 18^{aad}

Asaasida

iyo Dhisida Baananka Islaamiga ah

1. Dalka Jamhuuriyadda

Somaliland waxaa laga asaasi karaa Baanan Islaamiya si waafaqasan xeerkan waxaanay hawlhooda u gudanayaan sida uu dhigayo Xeerkan iyo Xeerka Baanka Dhexe iyo xeerarka kale ee la xidhiidha ganacsiga iyo maaliyadda ee aan ka hor imanayn Axkaamta Shareecadda Islaamka.

2. Baananka

Islaamiga ahi waxay yeelanayaan shakhsiyad qaanuuni ah oo madaxbannaan.

3. Baan

Islaamiya waxa dhisi Kara shirkad ama shirkado waddaniya oo ka diiwaangashan dalka gudidhiisa, iyadoo sidoo kale la oggol yahay in Baan Islaami ah oo caalami ahi ka furan karo laamo Somaliland, si waafaqsan Qodobada 13 -14aad ee xeerkan.

Qodobka

19^{aad}

Xadaynta Lahaanshaha Saami

Raasamaal

1. Cidina ma yeelan karto haddii aanay ahayn, Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland ama Shirkad waddaniya oo ruqsad u haysata ka-ganacsiga hawlaha baan Islaamiya, ama hay'ad maaliyadeed oo waddani ah mooyaane; raasamaalka aasaasiga 51%.

2. Baan ama shirkad maaliyadeed oo ajanebi ahi, ma yeelan karto wax ka badan 49% saami ee raasamaalka baankaas/shirkaddaas.

Qodobka 20^{aad} Xidhiidh Baan Shisheeye oo uu Sameysan Karo Baan Islaami ahi

1. Iyadoo loo hoggaansamayo faqrada 2aad ee qodobkan Baan Islaamiya oo waliba waxa uu dibada ku yeelan karaa baan uu xidhiidh sugan (Correspondence Bank) la leeyahay iyo wakiilba. 2. Baanka Dhexe waxa uu go'aan qoraal ah ku siinayaa Baanka Islaamiga ah, aragtidiisa ku aadan Baanka uu xidhiidha la yeelanayo.

Qodobka 21^{aad} Rasamaalka (capital) Gundhiga Baan Islaami ah

1. Cidkasta oo daneynaysa in ay ka fuliso dalka Somaliland hawl Baan Islaami ah waxa ku waajib ah inay shubaan raasamaalka gundhigga ah ee baanka, kuna shubaan baan caalami ah oo la aqoonsan yahay si loo ilaaliyo hantida saamileyda iyo macaamiisha.

2. Raasamaalka gundhiga ah ee baan kastaa oo Islaami ahi waa **Shan milyan oo doolar (\$5,000,000)**.

3. Raasamaalka gundhigga ah ee ku xusan farqadda 2aad waa in caydayntiisa qoraal ahaan loogu soo gudbiyaa Baanka Dhexe ee Somaliland.

4. Ilaaha maaliyadeed ee Baanka Islaamiga ah waxa ay noqonayaan: a. Raasamaalka baanka ee ay bixiyeen saamilayda baanku b. Dhigaalada kala duwan ee baanka.

c. Kaydadka qoondaysan ee ka yimi faa'iidooyinka guud ama kuwa saafiga ah ee baanka.

d. Ilo kale oo waafaqsan xeerkan iyo shuruucda baanka

BAANANKA Qaab-dhismeedka Islaamiga ah CUTUBKA 6AAD MAAMUL EE

Qodobka 22^{aad} Qaab-dhismeedka Maamul ee Baananka Islaamiga ah Baan kasta oo Islaami ah oo lagu dhisay si waafaqsan xeerkan waxa uu yeelanayaa qaab-dhismeed maamul oo ah sidan:

1. Golaha Saamileyda Guud:

Waa hay'adda maamul ee ugu saraysa ee baan kasta oo Islaami ahi leeyahay waxaana ka mida awoodaheeda:

- a. Eegista iyo ogolaanshaha xeerka aasaasiga ah, xeer hoosaadka iyo ansixinta qorshe sannadeedka baanka;
- b. Waxay dooranayaan golaha agaasinka baanka, waxaanay xaddidayaann gunnooyinkooda.
- c. Waxay ogolaanayaan/diidi karaan/xisaab xidhka sannad maaliyadeedka baanka.
- d. Waxay magacaabayaan golaha shareecada ee baanka islaamiga ah.

2. Golaha Agaasinka Baanka:

Waa Golaha Maamula Baanka waxaanay si toosa mas'uul uga yihiin ilaalinta Qodobadda Xeerkan iyo wixii awaamiira ee ka soo baxa Baanka Dhexe, waxaanay fulinayaan ujeedooyinka guud ee baanku leeyahay ee ku xusan xeerka asaasiga ah ee baanka. Waxa kale oo ay qaabanayaan hawlaha soo socda:

1. Waxa ay dejinayaan qorsheyaasha iyo sidaanadaha guud (General Policies) ee baanka khaasatan wixii dhinaca horumarinta iyo hawlaha maalgelinta, taageero fidinta ee uu baanku samaynayo.
2. Waxa ay magacaabayaan maamulka guud ee baanka iyaga oo u eegaya dhinacyada akhlaaqda, aqoonta, kartida iyo waayo-aragnimada shaqo ee hawladeenku leeyahay.
3. Waxa uu Golaha Agaasinka Baanka yeelan karaa, guddi hoosaadyo u qaybsan qaabka hawlaha muhiimka ah ee baanka.
4. Waxa ay baadhis, qiimeyn iyo dabagal joogto ah ku samaynayaan dhammaan hawlaha baanka.

3. Maamulka Guud ee Baanka:

1. Maamulka guud ee Baanka Islaamiga ahi waxa uu masuul ka yahay inuu si habsamiya oo waafaqsan shuruucda iyo xeerarka baanka u socodsiiyo dhammaan hawlaha baanka.
2. Maamulka guud ee baanku waxa uu fulinayaa qorshayaasha iyo siyaasadaha guud ee Golaha Agaasinku u dejiyey hawlaha baanka.
3. Waxa ay magacaabayaan shaqaalaha iyo hawladeennada baanka oo ay ku xulanayaan aqoontooda, amaannada iyo

akhlaaqda wanaagsan ee shaqaalahaasu leeyahay, waxaanay soo saarayaan wixii go'aanno (Decisions) iyo wareegtooyinka (General Regulations) ee lagu hagayo shaqadda baanka.

4. Waxa ay u gudbinayaan dhammaan tirakoobka iyo xogaha Baanka Dhexe uga baahdo ama uu ka dalbado ee khuseeya hawlaha Baanka Islaamiga ah.

5. Waxa ay diyaarinayaan, isla markaana u gudbinayaan Golaha Agaasinka ee baanka xisaab-xidhka iyo warbxinta maaliyadeed ee sannadlaha ah.

Qodobka 23^{aad} Ilaalinta Sirta Baanka

1. Waxa ka reeban xubin kasta oo maamulka baanka ka tirsan ha ahaato Guddoomiyaha Golaha Agaasinka, ku-xigeenkiisa, maamulaha baanka, ku-xigeenkiisa iyo shaqaalaha baanka inuu faafiyo sir ama xog la xidhiidha xisaabaha macaamiisha, macaamilkooda ganacsi ama maaliyadeed, taasoo uu ku helay shaqadiisa rasmiga ah ee baanka. Waxa laga soo reebayaa Qodobka kor ku xusan arrimahan soo socda:

2. Xogaha iyo tirankoobyada uu soo codsado Baanka Dhexe isaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo. Baanka Dhexe xogahaas uma sii gudbin karo cid kale.

Qodobka 24^{aad} Dhigaalka Baanka iyo Xadayntiisa

1. Qof ama shirkad aan haysan ruqsad ansax ahi ma qaban karo mana geli karo ganacsi dhigaal-qabasho ah.

2. Dhigaalada bangiyada Islaamiga ahi, waxay u qaybsamayaan xisaab socota, xisaab-keydsi ama xisaab maalgashi.

3. Marka la eegayo qodobkan farqadiisa 2aad, lacag waa loo bixin karaa qaab u muuqan kara inuu yahay mid hantiyeed ama adeeg ama amaah-reeb, keliya haddii:

A. Dhigaalkani yahay mid horumarin u ah ama Qayb ka ah qiimaha qandaraas wax-kala-iibsasho, kiro, amaah hanti-is-dhaafsi ama adeeg, oo dib loo soo ceshan karo haddii aan qandaraaskii

ama hantidii ama adeegii la iibin ama la kirayn ama si kaleba loo bixin.

B. Marka dhigaalku daboolayo dammaanad u yahay qandaraas fulintiis ama khasaare iman Kara oo sababi Kara in uu fuliyo qandaraas lagu heshiiyey.

C. Dhigaalku dammaanad ka yahay soocelinta ama keenidda hantiyeed oo dhan sida ku cad xeerkan

5. Marka laga hadlayo Xeerkan “*Dhigaal*” looma arkayo lacag uu bixiyey Baanka Dhexe ee Somaliland.

Qodobka 25^{aad}

Kaydka Qoondaysan ee Baanka

- 1.** Baananka Islaamiga ah ee lagu aasaasay si waafaqsan xeerkan waxa ay haynayaan oo illaalinayaan kayd qoondaysan oo ka imanaya faa’iidada saafiga ah ee baanka sannadkii kadib marka laga saaro qadarka sakada ah ee ku waajibtay.
- 2.** Bangiga islaamiga ahi waxa uu 10% oo faa’iidadiisa saafiga ah ee sannadkii u wareejinayaa kaydka qoondaysan.
- 3.** (Paid-up Capital) ee baanka marka waxaa la joojinyaa wareejinta faa’iidada loo wareejinayo kaydka qoondaysan.
- 4.** Haddii Baanka Dhexe uu ku qanco in kaydka qoondaysan ee Baanka Islaamiga ahi ku filan yahay ganacsigiisa, marka Baanka Dhexe waa ka dhaafi karaa in muddo ah in faa’iidada loo wareejiyo kaydka qoondaysan.

Qodabka 26^{aad}

Hantida Dareertada ah (Liquid Assets):

- 1.** Baanka Dhexe xilli marka uu joogaba waxa uu dajinayaa hantida dareertada ah ee ugu yar ee looga baahan yahay inuu hayo baan kasta oo Islaami ah.
- 2.** Goynta hantida dareertada ah ee kor ku xusan waxa Baanka Dhexe ku salaynayaa qaab boqolay ah oo ay ka baxsan tahay dhigaalada maalgashiga ah ee uu Baanku leeyahay.
- 3.** Baananka Islaamiga ahi waxay mar walba fulinayaan diyaarna u ahaanayaan inay bixiyaan dhigaalada socda iyo kuwa waqtigoodu

bislaado (Demand Deposit/Sight Deposit) ee macamiishooda u hayaan markay dalbadaan.

Qodobka 27^{aad}

Xidhiidhka Baanka Dhexe iyo Baananka Islaamiga ah

Sida ku cad cutubka 9aad qodobkiisa 83aad:

1. Banaanka Islaamiga ahi waxay qayb ku yeelanayaan qolka ama hoyga wax is dhaafsiga baananka (*clearing room*) ee Baanka Dhexe qaban qaabsho hab waafaqsan axkaamta Shareecada Islaamka.
2. Haddii ay baahi ku timaaddo Baan Islaamiya waxa uu Baanka Dhexe u fidinayaa taageero waqti gaaban ah (*Short Period Financing*) Baanka Islaamiga ah iyadoo la raacinayo heshiis ku salaysan Shareecadda Islaamka.
3. Taageerada noocan ahi waxay shaqaynaysaa muddo aan ka badnayn 12 bilood.
4. Baanka islaamiga ahi waxa xisaabo ka furan karaa si waafaqsan Qodobka 85aad ee Xeerka Baanka Dhexe, kuwaasi oo noqon Kara xisaabo lacago qalaad ah (Hard Currency) iyo ta dalkaba sidaaso kale waxa samayn Kara Baanka Dhexe oo xisaabo ka furan kara Baanka Islaamiga.

CUTUBKA 7^{AAD}

DAMAANADHA FAA'IIDO QAYBSIGA, ISKU BIIRIDDA BAANANKA IYO XAKAMAYNTOODA

Qodobka 28^{aad}

Bixinta Damaanadaha Daymaha iyo Horumarinta Maaliyadeed

1. Baanka Islaamiga ahi masiin karo shirkad gaar ah, ha ahaato mid gaar ah (private) ama mid dawli ah (public) ama shakhsi gaar ah, wax amaaha (muraabaxa) ama horumarin ah ama dammaanad oo isku darkoodu ka badan yahay 25% raasamaal ka baxsan Baanka.
2. Waxa kale oo Baanka Islaamiga ah ka reeban:
 - a. Inuu bixiyo dayn ama horumarin kasta oo lagu damaanad qaadayo saamiyo cidi ku leedahay Baanka

- b.** Inuu siiyo wax dayna ama horumarina hawl-wadeennada ama shaqaalaha baanka oo ka badan mushaharka hal (1) sanno ee shaqaalaha ama hawl-wadeenkaas
- c.** Inuu bixiyo deymo aan si buuxda looga taxadarin oo la siiyo ;
 - 1.** Qaar ka mid ah saraakiisha Baanka
 - 2.** Qof kasta oo dadka hoggaanka baanka ku jiraa dan ka leeyahay wakiil ahaan, waayeel ahaan, maareeye ahaan ama saamile ahaanba
 - 3.** Qofkasta oo dadka saraakiisheedu uu ka yahay damiin
 - 3.** Bixinta dayn kasta oo taagan ama amaah-fududayn la siiyay cid kasta oo ka tirsan agaasinka baanka ama ay hay'adda ama maaraynteeda oo aan,
 - a.** Si buuxda Guddida baanku isagu waafaqin bixinteeda
 - b.** Si caadi ah ama dhabbo caadi ah loo soo marin oo la mid ah tan macmiilka caadiga ahi maro
 - c.** Toddoba (7) maalmood gudohood Baanka Somaliland lagu soo ogaysiiyo
 - 4.** Waxaa ka baxsan sida ku dhigan farqadaha 1aad iyo 2aad ee Qodobkan waxyaabaha soo socda:
 - a)** Wixii macmiila ee lala samaynayo hay'ad xukuumiya (Public Entity)
 - b)** Dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee dhexmaraya baanku laamahay leeyihiin
 - c)** Macaamilaadka ganacsiga ah ee khuseeya dhoofinta iyo keenista badeecadaha keenista marka laga dalbado ictimaad baanka, isla markaana baanku leeyahay, documenti-yada caddeynaya badeecada sida (Bill of Exchange, Bill of Lading)

Qodobka 29^{aad}

Faa'iido iyo Khasaare Qaybsiga Baankiga Islaamiga:

- 1.** Baanna uma qaybin karo saamiyada baanka wax faa'iido ah haddii marka hore laga saarin:
 - a.** Dhammaan wixii kharashaad ku baxay dhisida iyo aasaaska baanka
 - b.** Dhamaan wixii khasaare ah ee wax dabboola oo dhab ah loo heyn

2. Baanku waa inuu kutalo gal usameeyaa dhammaan daymaha quusta ah (Bad Debts) iyo kuwa laga shakisan yahay soo noqoshadooda.
3. Baanku wuxuu awood u leeyahay bixinta sakada dhammaan ku waajibtay saamiyada ku jira raasamaalka baanka.

Qodobka 30^{aad} Isku Biirida Baananka

1. Baanka Islaamiga ah waxa u bannaan inuu ku biiro baan ama baanan kale oo islaami ah oo xeerkooda aas aasiga ahi dhigayo ku dhaqanka axkaamta Shareecadda Islaamka
2. Baan aan Islaami ahayni waxa uu isu beddeli karaa gabi ahaanba ama qayb ahaan Baan Islaamiya si waafaqsan xeerkan, xeerka Baanka Dhexe Lam.54/2012 iyo Xeer lam. 25/2004, isla markaasna ku dhaqmaa u hogaansanaan buuxda “full compliance” ee Shareecada Islaamka.
3. Haddii Baan aan Islaami ahayni isu beddelo Baan Islaami ah ama uu qabto adeeg maaliyadeed oo Islaami ah waxa looga baahan yahay inuu buuxiyo dhammaan shuruudaha Baan Islaami ah oo cusub oo ku salaaysan shareecada Islaamka iyo inuu bixiyo fee-ga, deposit-ka, cashuur sanadeedka iyo rasamaalka (capital) iyo dhamaan qodobada kale ee shuruudaha Xeerkani dhigayo
4. Isku biirista iyo la wareegista ee dhexmarta laba baan iyo wax ka badan ee waafaqsan xeerkan waxay ku ansaxaysaa go’aan kasoo baxay fadhi caadi ah ee Golaha Agaasinka Baanka.

Qodobka 31^{aad} Golaha Shareecada Islaamka ee Baanka:

1. Baankasta oo Islaami ah waxa waajib ku ah inuu yeesho Golaha Shareecadda;
2. Golaha Shareecadda ee Baanka Islaamiga ahi waa hay’ad ka kooban culimo lagu kalsoon yahay aqoon xeel dheerna u leh Shareecadda Islaamka, gaar ahaan fiqiga maalka axkaamta ganacsiga iyo mucaamalaadka, si fiicana ula socda hababka maalgalined ee ay u shaqeeyaan Baananka Islaamiga ahi, awoodna u leh ka jawaab bixinta arrimaha cusub ee la soo gudboonaada Baanka iyo qaabkiisa shaqo, waana in ay ka mid

tahay cid aqoon u leh arrimaha dhaqaalaha iyo qaanuunka ee dalka gaar ahaan baananka.

3. Tirada Golaha Shareecaddu Kama yaraan karaan saddex (3) xubnood oo uu ku jiro xidhiidhiyaha Golaha Shareecadda iyo baanku.
4. Golaha Shareecadda waxa lagu magacaabayaa shirweynaha guud ee samilayda
5. Golaha waxa loo qoondeynaya miisaaniyad lacageed ee ay ku shaqeynayaan sannadka sidoo kale waxa loo diyarinayaa xaruntii iyo dhammaan agabka shaqo ee ay u baahan yihiin
6. Xubnaha Golahani shaqo kale kama qaban karaan baanka kamana mid noqoon karaan hantileyaasha baanka
7. Haddii xubin ka mida Golaha Shareecaddu ka baxo ama geeriyooto xubinimada Golaha waxa uu Golaha Agaasinka Baanka (Board of Director) ayaa sii magacaabaya xubin buxisa jagada bannaanaatay, kadibna waxa loo bandhigayaa shirweynaha guud marka uu qabsoomo
8. Golaha Shareecaddu waxay yeelanayaan Guddoomiye, Guddoomiye-ku-xigeen iyo Xoghaye
9. Golaha Shareecaddu waxay yeelanayaan guno oo ay u gooyayaan Golaha Samileeyada Baanku

Qodobka 32^{aad}

Masuuliyadda & Awoodaha Golaha Shareecada

1. Golaha Shareecadda Islaamku iyo Guddiga Agaansinka Baanka Islaamiga ahi waxay si wadajir ah u diyaarinayaan qaababka heshiisyada iyo hawlaha la xidhiidha macaamilaadka bangigu la yeelanaayo saamilayda maalgashiyaasha baananka, hay'adaha maxaliga ah iyo macmiisha kale oo dhan.
2. Waxay Agaasinka Baanka Islaamiga ah u soo jeedinayaan qorshaha hawl- sannadeedka baanka.
3. Waxay ka qaybqaadanayaan wax-ka-beddelka iyo harumarinta qaababka shaqadda iyo hashiisyada dhexmaraya iyo cidkasta oo kale, si ay u suuro galiyaan waafajinta axkaamta Shareecadda Islaamka.
4. Tallooyinka sharciga ah ee ay bixiyaan Golaha Shareecadda ee Baanku waa mid fulinteedu waajib ku tahay Agaasinka Baanka Islaamiga ah.

5. Waxa ay masuul ka yihiin curinta hab maalgalinede iyo adeegyo cusub oo waafaqsan Shareecadda Islaamka.
6. Waxa ay hubinayaan sharcinimada dhammaan ganacsiga adeegyada Baanka Islaamiga ah gudanaayo.
7. Waxa ay bixinayaan tabobaro dhinaca sharciga ah oo ay siinayaan shaqaalaha baanka, si ay kor ugu qaadaan fahamka dhinacyada sharci ee khuseeya shaqadooda.
8. waxa ay jawaabo sharci ah iyo taloba ka bixinayaan hadba xaaladdaha ama dhacdooyinka cusub ee ay u soo gudbiyaan Agaasinka Baanka Islaamiga ah
9. Waxa ay tallooyin sharci ka bixinayaan hadba waxii khaladaad uga muuqda hawl-maalmeedka baanka, haddii;
 - a. Agaasinka Baanku u soo gudbiyo ama
 - b. Iyagu baadhitaan ku sameeya Baanka ku ogaadaan
10. Golaha Shareecaddu waxa ay soo saarayaan warbixin sannadle ah oo ka kooban arrimahan hoos ku qoran
 - a. Qiimaynta sida baanku u illaalinayo ku dhaqanka shareecadda Islaamka iyo fulinta talooyinka Golaha Shareecada u gudbiyey baanka
 - b. Caqabadihii (obstacles) ka hor yimi intay ku jireen gudashada waajibaadkooda sharci, sannad-xisaabeedka dhammaaday iyo siday uga gudbeen.
 - c. Su'aalihii la soo waydiiyey iyo arrimihii loo soo bandhigay sannadka dhexdiisa, kulamadii ay yeelatey Guddidu, arrimihii ay ka doodeen, shirarkii ay ka qeybgaleen iyo waxyaalaha ay ku saabsanaayeen
 - d. Qiimeyn warbixinta miisaaniyadda guud (annual report) ee baanka iwm.

Qodobka 33^{aad} **Xidhiidhka Golayaasha Shareecadda**

Maadaama aanay Guddida Shareecaddu si maalinle ah ugu soo shaqo tegayn baanka ee ay tahay hay'ad la talineed oo si wakhtiyaysan u kulmeysa waxa:

1. Baanku uu yeelanayaa xubin si joogto ah u metesha Golaha Shareecadda, si toos ahna uga hawlgasha baanka, si meel dhow loogala socda hawsha ka socota baanka, loona xidhiidhiyo Golaha iyo hawl-maalmeedka baanka.

2. Xidhiidhiyuhu waxa uu si joogto ah ula soconaysaa shaqo maalmeedka baanka, waxana uu hubinayaa meelmarinta qaabka shaqo iyo siyaasadda sharci ee Golaha.
3. Xidhiidhiyuhu waxa uu ka talo bixinayaa dhacdooyinka maalinlaha ah ee xidhiidhka la leh dhinacyada sharciga.
4. Waxa uu u habeynayaa golaha shareecada hadba arimaha u baahan in ay ka soo saaraan go'aan, fatwo ama qaraar rasmi ah oo qoraal ah.

Qodobka 34^{aad}

Nidaamka iyo Gabogabaynta Baanka Islaamiga ah

1. Marka ay timaado xaalad kala darista iyo gabogabaynta baan waxaa la raacaayaa Qodobada 191aad, 192aad, 196aad, 199aad iyo 200aad ee Xeer Lam: 25/2004
2. Haddii Baan Islaami ahi uu kaco ama xidhmo waxa bixinta qaamaha loo kala horreysinaya sidan:
 - a. Marka hore waxa la bixinaya wixii amaanooyin cadaantoodu yaallo;
 - b. Ka dib bixinta amaanooyinka waxa la bixinayaa qaamaaha ka yimi xisaabaadka socda
 - c. Labada qodob ee hore ka dib waxa la bixinaya qaamaha ka yimi xisaabta keydka ama maal-gashiga.
 - d. Wixii soo hadha waxa loo qaybinayaa saamilayda baanka iyada oo lagu salaynayo qaybinta sida saamiyada ay u kala leeyihiin ama jiraan saamiyo si gaara loo hormarinayaa.

CUTUBKA SAAD

QODOBO GUUD

Qodobka 35^{aad}

Maalmaha Shaqadda iyo Fasaxyada Baananka

1. Baanka Dhexe ee Somaliland isagoo raacaya xeerka shaqaalaha waxa uu xadidayaa shaqo iyo maalmaha fasaxa baananka ee rasmiga ah sanadka kasta.
2. Baana ma joojin karo hawlihiisa shaqo hadii aanu oggolaan Baanka Dhexe JSL.

Qodobka 36^{aad}

Denbiyada Agaasimashaasha, Shaqaalaha iyo Wakiillada.

Agaasime, Maareeye amaana-haye (Trustee), Hanti-dhawre, shaqaale ama wakiil baan kasta oo islaamiya, haddii ay ku cadaatoo in lagu helo qodob ama qodobadda hoose uu mutaysan doono ganaax dhan 5 shan million oo shillin Somaliland, ah ama xadhig aan ka badneyn muddo labo 2 sanno ah labada ganaax iyo xadhig laysugu daray si waafaqsan xeerka ciqaabta guud iyo xeerka musuqmaasuqa:

1. Si badheedh ah u sameeyeey, ama sababay in la sameeyo diiwaangelin aan sharci ahayn.
2. Bixiyey warbixin, shati (slip), dukmanti, ama qoraal ganacsi, arrimaha wax fal iibsashada (transactions), shuruudaha raasalamaalka (assets) oo aan sifo sharci ah ku bixin.
3. Si badheedh ah, u beddeley, tirtirey, qariyey, ka jaray ama sabab u noqdey xisaabo baan sifo aan sharci ahayn.
4. Been abuur dockmanti, rukhsad, lacag bixin sir macmiil, joojin fulinta amar maxkamadeed iwm.
5. La shaqayn la'aan iyo hortaagid cid kasta oo sifo kasta xeerkan waafaqsan uga codsata xog la xidhiidha baanka, sida hanti dhowrka guud, baadhintaanka Baanka Dhexe iwm.
6. Ku kicid ama fududeyn arrimo khiyaamo iyo wax is-dhaafdhaafin ah.
7. Fududeyn ama ka gaabin joojinta fal danbiyeed ka soo hor jeeda dhaqan gelinta xeerkan.
8. Xil gudoshlo la'aan, baylah, ama ku kicid fal keeni Kara hanti luns, bixin xog aan sax ahayn ama qarintan xog bixinteed xaq loogu lahaa ama fal Marintan habaabin iyo been abuur ah.

Qodobka 37^{aad}

Ciqaabo

1. Baanka Somaliland, marka ay u caddaato in la baalmaray shuruucda Xeerkan, waxa uu qoraal ku ogeysiinayaa hay'adda ay khuseyso ee xeer jebintu ku cadaatey.
2. Iyadoo la tixglinayo awooddaha Golaha Agaasinka Baanka Dhexe ee ku xusan Xeerkan baan kasta oo Islaami ah oo jebiya ama si badheedh ah u baalmara qodobadda Xeerkan, xeerarka kale

iyo wareegtooyinka waafaqsan qodobadda Xeerkan waxa uu mutaysanayaa ciqaab dhan toban (10) milyan oo shilin Somaliland ah.

3. Marka laga soo gudbo ogeysiinta Golaha Agaasinka Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu qoraal ku siinaya hay'adda geftey jadwal caddaynaya ciqaabaha ay mutaysatay iyo ganaax ku waajibey iyo wakhtiyada/qaababka loo kala bixinayo.

4. Haddii Baanka Somaliland ku qanci waayo xog laga siiyey gef la toosiyey oo baan ama hay'adi ku kacday, waxa Guddiga Agaasinku ku soo rogi karaan baankaas ciqaabo dheeraad ah ilaa gefkaas laga saxayo.

5. Haddii Baanku ku qanco in gefkii dhacay la toosiyey, ciqaabtiisii halkaas ayey ku hadhaysaa oo ku soo afjaramysaa

Qodobka 38^{aad}

Mamnuucida Dilaal Qaadashada Shaqaalaha

1. Agaasime kasta, sarkaal ama shaqaale ama qof kale oo mushahar ka qaata Baanka Islaamiga ah, haddii ay ku caddaato oo lagu helo qodobaddan hoos ku qoran mid ka mid ah, waxa uu noqonayaa dembiile fal dambi ku jira, waxaannu muteysanayaa ganaax dhan 5 shan million oo shilin Somaliland ama xadhig aan ka badnayn muddo 2 sanno ah ama labadaba ganaax iyo xadhig laysugu daray.

a. Qaadasho hadiyad, weydiistay, gacanta ku dhiggay, aqbalay ama oggolaaday, dilaal, mushahar, khidmad, bakhshiish, laaluush ama wax kasta oo qiimo leh oo lagu doonayo in lagu gaadho xaq cid kale leedahay ama lagu horjoogsanayo bixin xaq kale.

b. Sixir-ka-dhimis aannu awood u lahayn oo loogu tixgelinayo cidkale, lacag (note), jeeg, qaan-sheegta ee is-weydaarsiga (bill of Exchange) ama in qof loo oggolaado casayn xisaabta uu baanka ku leeyahay.

2. Cid kasta oo lagu soo oogo dembiyada kor ku xusan mid ka mid ah, wuxuu xaq u leeyahay – hadduu ku qanci waayo eedayntaas – inuu is difaaco racfaana ka qaato xukunka lagu riday.

Qodobka 39^{aad}:
Oogolaanshaha Xeer-illaaliyaha Guud

1. Dembiyada iyo ciqaabaha xeerkani tilmaamayo, waxay cid ku fuli karaan oo keliya markay maxakamad awood u leh horteed kaga caddaadaan.

Qodobka 40^{aad}
Fasiraad Qodobada Xeerkan

1. Qodobada xeerkan waxa loo fasirayaa si waafaqsan dastuurka, axkaamta iyo shareecada islaamka, Xeerka Baanka Dhexe, Xeerka Shirkadaha iyo xeerarka kale ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Qodobka 41^{aad}
Shuruud guud

Shuruudaha lagu qiyaasayo ku haboonanta xirfadeed iyo Kan dhaqameed ee dadka loo xulayo mamulida bangiyad/hay'adaha

a. silooga go'aan gaadho ku-haboonanta dhaqan iyo/ama xirfadeed ee cidda loogajeedo inay hogaansamaan hayada waxa, baangiga somiland ka hubinayaa sarkaalka, intii surtagal ah tilmaamahan hoosku cadd;

1. in qofku aqoon ama misaan leeyahay

2. kartidiisa iyo sida uu ugu haboon yahay qofka go'aanka saxa ah qaadankara howlaha hogaamintooda looga soo jeedinayo

3. heerka dedaal ee ay uu muuqato in taa qofkaasi galinkaro xilka loo igmaday

b. iyada oo aan waxa loo dhimayn tilmaamaha farqada (a) bangiga Somaliland wax uu dib uu eegi karaa dhaqankiisi iyo soyaalkiisi /waaya-argnimadiisa shaqo ee hore ee mas'uulka, siba dhinaca hawsha loo igmayo ama howlaha la xiidhiidha dhinaca maaliyada, isaga oo hubinaya;

1. qofka lamiisamayo uu hore xadhig ugu mutaystay arimo laxiidhiidha khiyaamo iyo wax-isdaba-marin, oo muujinaya inuu yahay qof aan daacad/ aamin ahayn

2. qofka hore uu jabiyay qawaaninta loogu talagalay inay dadwaynaha ka ilaaliyaan hantidooda oo la lunsado daacad-

darraantiisa ama karti-darradiisa ama habdhaqan-xumadiisa darged isaga oo haya hawlo bangiga caymis, malgalin ama adeeg maliyadeed oo kaleba

3. sarkaal ama agaasime hay'ad laalaabatay oo hawl iyo hantiba gabtay ama hadda la soo gabagabaynayo howlihii ganaacsiga ee ay haysay

4. uu qayb ka ahaa hawl-fulinno hore bangiga Somaliland qaaday kuwo daadac-daaro, lunsii hantiyeed ama aan ku habboonayn/qaynuunka balmarsan uu ku lug lahaa oo wax dhimay qaabkiisa howl fulineed

5. uu ka qayb qaatay ama lugu xidhidhinayo/susuusta howlo ama falgallo shaki galin kara awooddisa hoggaamineed, hawl gal ama go'aan qaadasho Baanka Somaliland waxa uu ka dalban karaa cidkasta oo masuuliyada-qabashadiisa la eegayo, inuu keeno waxyaabo kale oo ka marag fura ku-haboonantiisa, awoodisa hawl fulineed iyo heerkiisa xirfadeed ama dhaqan shaqsiyadeed.

Qodobka 42^{aad}


Nasakhaad ama Laalis

Waxa la laalay ama la nasakhay xeer ama sharci kasta oo ka soo horjeeda xeerkan

Qodobka 43^{aad}

Dhaqangalka Xeerkan

Xeerkani waxa uu dhaqangalaayaa marka Golaha Wakiiladu ansixiyo madaxweynuhuna saxeexo.



C/risaaq Siciid Ayaanle
Xog.Guud ee Golaha Wakiilada



C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

Somaliland Central Bank
Foomka Codsiga Ruqsadda ka-ganacsiga Hawlo Bangi

Form A

Magaca Bangiga: (Suggested Name)

Cinwaanka Bangiga:

P.O Box

Tell:

Email:

Fax:

Company Registration Number _____

Waxaanu si sharaf iyo qadarin leh idiinka codsanaynaa Ruqsad ka-ganacsi hawlo bangi, iyada oo aanu halkan idiin ku soo lifaaqay shuruucdii bank,a liiskii aasaasayaasha iyo liiskii Agaasimayaasha Sare ee Baanka

1. Tafaasiisha Raasamaalka:

a. Issued share capital (Nominal Value)

b. (Paid-upshare capital

Name:

Address: Tell:

Mobile: Email:

Taariikh:

Magaca Guddoomiyaha:

Saxeexa:

Somaliland Central Bank

Foomka Codsiga Ruqsadda Ka-ganacsiga Hawlo Bangi

(Bangiyada Ajinebiga ah)

Form B

Magaca Bangiga:

.....

Cinwaanka Bangiga:

.....

Waxa uu halkan ku codsanayaa Ruqsad ka-ganacsi hawlo bangi

1. Waddanka/Dalka uu ka Diiwaangashan Yahay:

.....

2. Halka uu ku yaallo Xafiiska la diiwaangeliyey:

.....

3. Tafaasiisha Raasamaalka:

.....

a. Qiimaha uu u dhigmo (Nominal Value)

b. Qiimaha Baxsoon (Paid-up Value)

c. Raasamaalka Laanta Somaliland

1. Magaca iyo Cinwaanka Maareeyaha Guud/Sarkaalka Fulinta:

.....

.....

.....

.....

Taariikh:

Saxeexa Guddoomiyaha/Sarkaalka Fulinta:

.....

Foomka Codsiga Ruqsadda Ka-ganacsiga Hay'ad Maaliyadeed

FORM C

1. Magaca Hay'adda Maaliyadeed

.....

2. Cinwaanka Hay'adda:

.....

Waxa uu halkan ku codsanayaa Ruqsad ka-ganacsi hawlo bangi

3. Tafaasiisha Raasamaalka:

a. Qiimaha uu u dhigmo (Nominal Value)

b. Qiimaha Baxsoon (Paid-up Value)

4. Magacyada iyo Cinwaanka Agaasimeyaasha:

.....

.....

.....

.....

Magaca iyo Ciwaanka Guddoomiyaha iyo Sarkaal Fulinta:

.....

.....

.....

.....

QAYBTA LABAAD:
XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO
DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:

JSL/M/XERM/249-1367/102012

04/10/2012

WAREEGTO MADAXWEYNE No:
0271/102012

Hantida Ma-guurtada ah ee Dawladda

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu arkay; Oodobka 90^{aad} ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland,
- Markuu arkay; Oodobka 12^{aad} ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland,
- Markuu arkay; Xeerka Dhulka X. Lr. 17/2001,
- Markuu tixgeliyey; Wareegtada Madaxweynaha ee
summadeedu tahay JSL/W/W/236-
747102011, Kuna taariikhaysan 16/10/11,

Markuu tixgeliyey; Xeerarka Dalka ee la xidhiidha Hantida Dawladda iyo lahaashaha,

Wuxuu soo saaray Wareegtadan

Qodobka 1aad

1. Waxa mamnuuc ah qofka gacanta ku haya Hantida ma-guurtad ah (sida Dhulka iyo Dhismayaasha Dawladda) inuu ku tagri falo iyo in uu qof kale ku wareejiyo.
2. Waxaa la joojiyey dhismaha dhulka shacabka iyo guryaha dawladda ee aan dawladu gacanta ku hayn. Waxa reeban in magdhaw la siiyo cid kasta oo dhisatay Dhulka dhismaha ka caagan (Dhulka Danta Guud ah, Dhulka Shacabka, Dhulka Garoomada diyaaradaha ku gedaaman, Dhulka Xeryaha Ciidammada, Iskuullada iyo Garoomada Ciyaaraha) mudadii ka danbaysay wareegtada Madaxweynaha ee summadeedu tahay NO: 004/2003.

Qodobka 2aad

In aan magdhaw la siin Qofka dhistay, dhalan-roggay ama si uun wax ugu daray Hantida ma-guurtada ee Dawladda, mudadii ka danbaysay wareegtada Madaxweynaha ee summadeedu tahay NO: 004/2003.

Qodobka 3aad

In gacan ku haynta Hantida Ma'guurtada ah ee dawladda ee shacabku gacanta ku hayo, lagu soo celiyo gacanta dawlada, waxaana loo saari doonnaa Guddi u gaar ah.

Qodobka 4aad

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guriyeynta, waxaa la faraya inay fuliyaan awaamiirta ay wareegtadani xambaarsantahay. Sidoo kale, dhammaan Taliyayaasha Ciidammada ee Qaranka iyo Booliiska, waxa la faraya inay gacan buuxda ka siiyaan Wasiirrada hirgelinta wareegtadan.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1368/102012

04/10/2012

XEER MADAXWEYNE NO:

0272/102012

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay; Qodobka 90aad fagradiisa 3aad, xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland,

Markuu arkay; In baahi weyn loo qabo dardargelinta, maamulka iyo hawlaha horumarineed ee Hay'addaha iyo Wasaaradaha Dalka,

Markuu tixgeliyey; Talooyinkii Mas'uuliyiinta kala duwan,

Wuxuu soo saaray Xeerkan

1. Hay'adda samafalka Madaxtooyada waxaa la-hoosgeeyey Wasaaradda Dib-u-dejinta.

2. Waaxda Dalxiiska ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, waxaa la-hoosgeeyey Wasaarada Dhalinyarada iyo Ciyaaraha oo iminka wixii ka dambeeya loogu yeedhayo Wasaaradda Dhalinyarada, Ciyaaraha iyo Dalxiiska.
3. Waaxda Dhaqanka ee Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha, waxaa la-hoosgeeyey Wasaaradda Warfaafinta iyo wacyi Gelinta oo iminka wixii ka dambeeya loogu yeedhi doono Wasaarada Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyi Gelinta

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1369/102012

04/10/2012

XEER MADAXWEYNE NO:

0273/102012

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay; Oodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland,

Markuu dersay; Baahida loo qabo in La dejiyo Hay'ad si
wax tar leh wax uga qabata sahaminta,
horumarinta, dhisidda iyo qorshaynta
Wadooyinka cusub ee isku xidha
Magaalooyinka.

Markuu tixgeliyay; Ahmiyadda weyn ee Horumarinta Waddooyinku ugu fadhayaan koboca dhaqaalaha dalka JSL,

Markuu tixgeliyey; Talada Wasiirka Wasaraadda Hawlaha Guud iyo Guriyeynta, Guddoomiyaha Hay'adda Waddooyinka iyo La-taliyaha Hay'adda Waddooyinka,

Markuu garwsaday; Inay tahay waqti ku habboon in la dhiso Wakaalad horumarisa oo daboosha baahida waddooyinka,

Isago maanka ku haya; Dib-u-habaynta, Horumarinta Hay'adda Waddooyinku in ay Qaranka muhiim u tahay,

Wuxuu soo saaray Xeerkan

Qodobka 1^{aad};

1. Waxa uu tirtiray Guddida Maamulka Waddooyinka (RoSAB), Hay'adda Waddooyinka Somaliland (SRA), iyo Sanduuqa Dhaqaalaha Waddooyinka (RFA).
2. Waxa uu laalay Wareegtada Madaxwayne ee sumadeedu tahay No.29/32000 ee soo baxday 6 March 2000.
3. Hawsha dayactirka waddooninkana, waxa uu Xeerkani u wareejiyey Wasaaradda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guriyeynta JSL, dakhliguna waxa uu uga imanaya qaybta ay ku leedahay (%) Cashuurta wado marista (R/Levy), Liisamada Gaadiidka (L/Levy) iyo wixii Deeq dayactir ah ee laga helo deeq-bixiyayaasha.

Qodobka 2^{aad}; Waxa Xeerkan lagu aasaasay Wakaaladda Horumarinta Waddooyinka (Road Development Agency (RDA)) oo hoos imananaysa Wasaaradda Madaxtooyada JSL, isla markaana yeelanaysa Maareeye Guud.

Qodobka 3^{aad}; Wakaaladan waxa loo aasasay si ay u horumariso shabakadda waddooyinka Qaranka (National Road Network), una dejiso hannaan lagu horumariyo waddooyinka.

Qodobka 4^{aad}; Xilka iyo waajibaadka Wakaaladdu waa;

1. Isku duwidda barnaamijyada horumarineed ee Waddooyinka Somaliland.
2. Sahaminta, isku xidhka iyo dejinta hannaanka dhismaha Waddooyinka.
3. Isku duwidda iyo isku habaynta barnaamijyada ku aaddan horumarinta Waddooyinka.
4. Maamulidda deeqaha iyo hantida lagu horumarinayo Waddooyinka.
5. Hubinta in hantida loo isticmaalay hab sax ah oo waxtar u leh Waddooyinka.
6. Ka talo-bixinta arrimaha la xidhiidha qorshaynta, dhisidda iyo hagaajinta Waddooyinka.
7. Diyaarinta siyaasad qaran oo ku aaddan horumarinta Waddooyinka.
8. Codsashada kaalmo gudeed iyo mid dibedeedba.
9. Maamulidda maaliyadda iyo samaynta xisaabo u gaar ah.

Qodobka 5^{aad};

1. Maareeyaha Wakaalada waxa soo magacaabaya Madaxweynaha JSL.
2. Mareeyaha Wakaaladdu waa sarkaalka maamulka iyo maaraynta Wakaaladda.

Qodobka 6^{aad};

Maareeyaha wakaaladdu wuxuu u xilsaaran yahay:

1. Fulinta go'aamada ka soo baxa Wasaaradda.
2. Wadidda hawl maalmeedka Wakaaladda.
3. Haynta raadraaca xisaabaadka, iyada oo la raacayo hab xisaabeedka laamaha dawladda.
4. La-saxeexidda jeegagga iyo foojarada Wasiirka iyo Agaasimaha Maamulka (Waxay ku baxayaan saddex saxeex), maamulidda maaliyadda iyo miisaaniyadda.
5. Diyaarinta warbixin sandeedka Wakaalada.

Qodobka 7^{aad};

1. Wakaaladdu waa in ay diyaarisaa warbixin sanadeed iyo xiligii loo baahdo, warbixintaas oo koobaysa wax-qabadka iyo hab-xisaabeedka Wakaaladda.

Qodobka 8^{aad};

Qorista shaqaalaha Wakaaladda waxa loo raacayaa Xeerka Shaqaalaha Dawladda

Qodobka 9^{aad};

1. Dakhliga Wakaaladdu waxa uu ka imanaya qaybta ay ku leedahay miisaniyadda Qaranka, qaybta ay ku leedahay Cashuurta Shidaalka (F/Levy) iyo wixii deeqo ah ee soo gala.

2. Habka maamulka maaliyada waxa loo racaayaa hanaanka Xeerarka maaliyada ee dalka.

Qodobka 10^{aad};

Wakaaladu waxay yeelanaysaa waaxaha lagama Maarmaanka u ah hawl gudashadeeda, waxaana Xeer ku soo saaraya Wasiirka.

Qodobka 11^{aad};

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa marka Madaxwaynuhu Saxeexo.

Allaa Mahad Leh

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1374/102012

13/10/12

XEER MADAXWEYNE No: 0274/102012

Magacaabid

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda
Somaliland**

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad, faqradiisa (2)aad ee
Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland,

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda wayn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka,

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagadan hoos ku xusan,

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo,

Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilka loo magacaabay,

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Saleeban Ciise Axmed, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiirka Wasaaradda Dib-u-dejinta ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1375/102012

13/10/12

XEER MADAXWEYNE No: 0275/102012

Magacaabid

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda
Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, faqradiisa (2)aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland,

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda wayn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka,

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagadan hoos ku xusan,

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo,

Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilka loo magacaabay,

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Cabdirasaaq Cali Cismaan, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiirka Wasaaradda Warshadaha ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland
JSL/M/XERM/249-1376/102012

13/10/12

XEER MADAXWEYNE No:

0276/102012

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Oodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Cabdisalaan Maxamed Xasan, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Macdanta, Biyaha iyo Tamarta ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SADEXAAD:
DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA,
AMARADA
IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA
WASIIRADA, IWM
JAMHUURIYADDA SOMALINAD
REPUBLIC OF SOMALILAND

WASAARADDA CADDALADDA
ARR.GARSOORKA



MINISTRY OF JUSTICE
JUDICIAL AFFAIRS

WC&A.G /XW/G-2/

/12

Date:1/10/2012

Ku: Radio Hargeysa,

=Hargeysa=

Ku: Telefishanka Qaranka SLNTV,

=Hargeysa=

Og: Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka,

=Hargeysa=

Og: Qareenka Guud ee Dawladda,

=Hargeysa=

Og: Guddoomiyaha Maxkamada Sare JSL,

=Hargeysa=

UJ: FULIN GO'AANO KASOO BAXAY GUDIGA CADAALADDA.

Wasaaradda Cadaaladda ee JSL, iyadoo cuskanaysa Qodobka **106aad** ee Dastuurka Qaranka Farqadiisa **1aad**, kaasoo qeexaya inay Wasaaradda Cadaaaladdu u xilsaaran tahay Fulinta Go'aanada Guddiga Cadaaladda.

Sidaa darteed, waxaanu Halkan ku faafinaynaa Go'aanka Lanbarkiisu yahay **MS/GGC/G-3/32/2012 ee 27/09/2012**.

WAXAY GO'AAMISAY.

- 1. Axmed Cismaan Mire**, waxaa laga soo bedelay Madax Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolka Awdal, waxaana loo bedelay Madax Xafiiska ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex.
- 2. Yuusuf C/Ilaahi Kaahin**, waxaa laga soo bedelay Madax Xafiiska ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex, waxaana loo bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee Xarunta Hargeysa.
- 3. Mawliid Cabdi Muuse**, waxaa loo magacaabay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex.
- 4. C/raxmaan Iid Maxamed**, waxaa loo magacaabay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex
- 5. Aswaad Maxamed Jibriil**, waxaa loo magacaabay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex
- 6. Malyuun Faarax Muuse**, waxaa loo magacaabay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex
- 7. Khadra Xuseen Maxamed**, waxaa loo magacaabay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex,
- 8. Saamiya Xuseen Nuur**, waxaa loo magacaabay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex
- 9. Cabdi Xasan Axmed** waxaa laga soo bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha ee Gobol/Degmo Gabilay, waxaana loo bedelay ku Xigeenka X/Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi-Jeex
- 10. Jaamac Ducaale Siciid**, waxaa laga soo bedelay Madax Xafiis ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Togdheer. waxaana loo

bedelay Madax Xafiiska Ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Saaxil.

11. **Yuusuf Biixi Maxamed**, waxaa laga soo bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex, waxaana loo bedelay Ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Saaxil
12. **Jamaal Jaamac Xaashi**, waxaa laga bedelay Madax Xafiiska ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha ee G/Saaxil, waxaana loo bedelay Madax Xafiis ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Togdheer.
13. **Cali Cabdi Cabdille**, waxaa laga bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex, waxaana loo bedelay Ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Togdheer
14. **C/Ilaahi Maxamed Ducaale**. waxaa laga bedelay Madax Xafiiska ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Sanag, waxaana loo bedelay Madax Xafiiska ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Awdal.
15. **C/rasaaq Ibraahim Maxamed**, waxaa laga bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex, waxaana loo bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Awdal.
16. **Yuusuf C/Ilaahi Cali**, waxaa laga bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex, waxaana loo bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee Xarunta Hargeysa.
17. **Siciid Yuusuf Cabdi**, waxaa loo magacaabay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee Xarunta Hargeysa
18. **Siciid Maxamed Obsiye**, waxaa laga bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex, waxaana loo bedelay Madax Xafiis ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/ Sanaag.
19. **Shucayb Maxamed Cilmi**, waxaa laga bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex, waxaana loo bedelay Madax Xafiis ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/ Sanaag
20. **C/kariim Xuseen Axmed**, waxaa laga bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi Jeex, waxaana laga bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Sanaag

21. **Aadan Salaad Seed**, waxaa laga bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Maroodi-Jeex, waxaana laga bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Degmo Gabilay.

ALLAA MAHAD LEH.

Xuseen Axmed Caydiid

WASIIRKA W/CADAALADDA & GARSOORKA.

QAYBTA AFRAAD:

AMARADA & GO'ADANADA MAAMUL

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXKAMADDA SARE

Supreme Court

المحكمة العليا

Tix: MS/GG/G-51/ /2012

Taar: 07/10/2012

KU: - GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA -HARGEYSA

OG: - GUDOOMIYAHA KOMISHANKA

DOORASHOYINKA -HARGEYSA.

OG: - GUDDOOMIYAHA XISBIGA KULMIYE -HARGEYSA.

OG: - MADAXWEYNAHA JSL -HARGEYSA.

OG: - Mudane: C/raxmaan Maxamed Jaamac-HARGEYSA.

Ujeedo: Dhaarin Mudane:

Tixraac Warqada sumadeedu Tahay KDQ/XK/282/2012 ee ku Taariikhaysan 30/09/2012, kuna saabsan Buuxin Xubin Banaanaatay ee Golaha Wakiilada, ee uu soo qoray Guddoomiyaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

Sidaas Darteed, Laga Bilaabo Maanta oo ay Taariikhdu tahay 07/10/2012, Saacaduna ahayd 10:00 wuxuu Mudane, C/raxmaan Maxamed Jaamac ku Dhaartay Hortayda, kana mid Noqday Mudanayaaha Golaha Wakiilada JSL.

Allaa Mahad leh.

(Dr. Yuusuf Ismaaciil Cali.)
Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee JSL.